# Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga

## Axdiga loogu tala galay dadka uu u adeego Nidaamka Caafimaadka Dadweynaha ee Koofurta Awstaraaliya

Government of South Australia
SA Health

National Library of Australia Cataloguing-in-Publication entry

Title: Your rights and responsibilities: a charter for patients of the South Australian public health system / Government of South Australia, SA Health.

ISBN: 9780730898276 (pbk.)

Subjects: Medical laws and legislation--South Australia.
Medical personnel and patient--South Australia.
Hospital patients--Legal status, laws, etc--South Australia.
Sick--Legal status, laws, etc--South Australia.

Other Authors/Contributors: South Australia. Dept. for Health and Ageing.
Dewey Number: 610.696

# Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga

*Hay'adda Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa ka go'an iney hubiso daryeelka caafimaad ee aad hesho in uu yahay mid ammaan ah, wax tar leh, oo wax ku ool ah, xushmeynayana xuquuqaha aad qof ahaan u leedahay.*

### *Helitaanka*
Waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada caafimaadka iyo kuwa bulshada

### *Ammaanka*
Waxaad xaq u leedahay inaad ka magan gasho wuxii xumaan ah

### *Tayada*
Waxaad xaq u leedahay adeegyo ay tayadooda sarreyso

### *Xushmada*
Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si xushmad leh

### *Wargelinta*
Waxaad xaq u leedahay in lagu war geliyo

### *Ka Qeybqaadashada*
Waxaad xaq u leedahay inaad si firfircoon uga qeybqaadato

### *Danta gaarka ah*
Waxaad xaq u leedahay dantaada gaarka ah iyo kalsoonidaada

### *Wax ka dhihidda*
Waxaad xaq u leedahay inaad wax ka tiraahdo ama aad ashtakooto

The National Relay Service can provide assistance for people who require hearing and speaking assistance. National Relay Service: http://relayservice.gov.au/ Phone: 1800 555 660. If you or your carer need help talking to the health professionals who are responsible for your care you can ask a staff member to arrange an interpreter for you free of charge. This book has been translated and is available on the SA Health website www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Amharic

የብሄራዊ የቅብብሎሽ አገልግሎት (The National Relay Service) የመስማትና የመናገር ድጋፍ ለሚፈልጉ ሰዎች ድጋፍ ሊሰጥ ይችላል። የብሄራዊ የቅብብሎሽ አገልግሎት (National Relay Service): http://relayservice.gov.au/ የስልክ ቁጥር: 1800 555 660 እርስዎ ወይም ተንከባካቢዎ ለእርስዎ እንክብካቤ ሀላፊነት የተቀበሉትን የጤና ባለሙያዎች ለማነጋገር እርዳታ ከፈለጉ ሰራተኞችን የነፃ አስተርጓሚ እንዲያዘጋጁልዎ መጠየቅ ይችላሉ። ይህ መጽሐፍ ተተርጉሟል፣ በደቡብ አውስትራሊያ የጤና ድረገጽ ላይ ያገኙታል www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Arabic

توفر خدمة البث الوطنية (National Relay Service) المساعدة للأشخاص الذين بحاجة للمساعدة في السمع والنطق. خدمة البث الوطني: http://relayservice.gov.au/ هاتف: 660 555 1800 إذا كنت انت أو من يرعاك بحاجة للمساعدة في التحدث مع مهنيي الصحة المسؤولين عن رعايتك، فإن بإمكانك الطلب من أحد الموظفين الترتيب لمجيء مترجم مجانا. تمت ترجمة هذا الكتيب وهو متاح على موقع دائرة صحة جنوب استراليا (SA Health) www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Chinese simplified

全国传递服务为有听障与语障的人士提供协助。全国传递服务的网址: http://relayservice.gov.au/电话:1800 555 660 如果您或者您的照顾者需要同主治医生交流，但又不会讲英语，您可以要求一名工作人员为您安排一位传译员，此服务免费。本手册已译成多种语言，可以在SA Health的网站上获取: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Chinese traditional

全國中繼服務可為需要聽力和語言協助的人提供幫助。全國中繼服務網址:http://relayservice.gov.au/ 電話:1800 555 660在與為您提供治療的專業醫護人員交流時，如果您或者您的看護者需要語言溝通方面的協助，可向有關工作人員要求安排傳譯員。此服務是免費的。本手冊已被譯成中文，可從南澳健康部網站獲得 www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Dari

خدمات رله ملی، افرادی که ضرورت به کمکهای شنوایی و گفتاری دارند را کمک کرده می تواند. خدمات رله ملی: http://relayservice.gov.au/ تلفون: 660 555 1800 اگرشما یا مراقب شما برای صبحت با کارکنان مسلکی خدمات صحی که مسولیت مراقبت از شما را برعهده دارند احتیاج به کمک دارید از یکی از کارکنان بخواهید تا بطورمجانی برای شما ترجمان بگیرد. این جزوه به زبانهای مختلف ترجمه شده و در وب سایت SA Health در www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities در دسترس می باشد.

## Dinka

Aguir Baai Wël Cuɔt a lëu bë kɔc kony tɛ̈ ye kek kɔɔc wïc kuɔɔny ë pïŋpïŋ ku jam.
Aguir Baai Wël Cuɔt: http://relayservice.gov.au/ Telepun: 1800 555 660. Na wïc dumuök du kuɔɔny bë jam kek kɔɔc panakïm wën kek gɛ̈m yï döc, ka yïn a lëu ba jam kek kɔɔc panakïm bïk yï wiëc raan bï waar thok ku kën a bïk looi majan. Athör kën a cë waar yic thok kɔ̈k ku a tɔ̈u lɔ̈kaɣukar ë Pial Guöp SA tɛ̈n www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Greek

Η Εθνική Υπηρεσία Αναμετάδοσης δύναται να παράσχει βοήθεια σε άτομα που χρειάζονται βοήθεια ακοής και ομιλίας. Εθνική Υπηρεσία Αναμετάδοσης (National Relay Service): http://relayservice.gov.au/ Τηλέφωνο: 1800 555 660. Αν εσείς ή φροντιστής σας χρειάζεστε β οήθεια για να μιλήσετε στους επαγγελματίες υγείας οι οποίοι είναι υπεύθυνοι για τη φροντίδα σας μπορείτε να ζητήσετε από ένα μέλος του προσωπικού να διευθετήσει δωρεάν διερμηνέα για σας. Το βιβλιάριο αυτό έχει μεταφρασθεί και διατίθεται στην ιστοσελίδα SA Health www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Italian

L’ufficio National Relay Service può fornire assistenza a persone che necessitano di aiuto per udire e parlare. National Relay Service: http://relayservice.gov.au/ Telefono: 1800 555 660. Se voi o il vostro badante avete bisogno di aiuto per parlare con lo staff medico che vi assiste potete chiedere ad un impiegato del nostro personale di chiamare un interprete gratuitamente. Questo libretto è stato tradotto ed è disponibile sul sito web SA Health www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Khmer

សេវា National Relay Service អាចផ្តល់ជូនជំនួយសម្រាប់អ្នកដែលត្រូវការជំនួយក្នុងការស្តាប់ និងនិយាយ។សេវា http://relayservice.gov.au/ ទូរស័ព្ទ៖ 1800 555 660 ប្រសិនបើអ្នក ឬអ្នកថែទាំរបស់អ្នកត្រូវការជំនួយក្នុងការនិយាយទៅកាន់អ្នកជំនាញផ្នែកសុខភាពដែលទទួលខុសត្រូវចំពោះការថែទាំ របស់អ្នក អ្នកអាចស្នើសុំសមាជិកបុគ្គលិកឲ្យរៀបចំអ្នកបកប្រែភាសាជូនអ្នកដោយឥតគិតថ្លៃ។ សៀវភៅនេះត្រូវបានបកប្រែ ហើយមានផ្តល់ជូននៅលើវ៉ិបសាយ SA Health: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Russian

Национальная релейная служба может оказать помощь людям, которые имеют нарушения слуха или речи. Национальная релейная служба: http://relayservice.gov.au/ Телефон: 1800 555 660. Если вам или лицу, осуществляющему за вами уход, необходима помощь во время беседы с медицинскими работниками, которые отвечают за предоставление для вас услуг по здравоохранению, вы можете попросить сотрудника, чтобы вам бесплатно предоставили переводчика. Эта книга была переведена и доступна на веб-сайте SA Health www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Spanish

El Servicio de Transmisión Nacional brinda apoyo a las personas que necesitan ayuda debido a problemas de audición o del habla. Servicio de Transmisión Nacional: http://relayservice.gov.au/ Teléfono: 1800 555 660. Si usted o su cuidador necesitaran ayuda para hablar con los profesionales de salud que están a cargo de su cuidado, puede pedirle a un miembro del personal que organice un intérprete de manera gratuita. Este folleto ha sido traducido y está a su disposición en la página web de SA Health www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Somali

Adeega Baahinta Qaranka ayaa taageero siin kara dadka in laga caawiyo u baahan hadalka iyo maqalkaba. AdeeggaBaahinta Qaranka: http://relayservice.gov.au / Telefoon: 1800 555 660. Haddi adiga iyo daryeelahaaga aad u baahataan in leydiinka kaalmeeyo la hadalka xirfadlayaasha caafimaadka ee masuulka ka ah daryeelkaaga waxaad weddiin kartaa mid ka mid ah shaqaalaha in uu kuu diyaariyo turjubaan bilaash ah. Buuga ayaa la tarjumay waxaana laga helaa website ka Hay’adda Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Swahili

Huduma ya Kuunganisha ya Taifa inaweza kutoa msaada kwa watu wanaohitaji msaaada wa kusikia na kuongea. Huduma ya Kuunganisha ya Taifa: http://relayservice.gov.au/ Simu: 1800 555 660. Kama wewe au mlezi wako anahitaji msaada wa kuzungumza na wataalamu wa afya ambao wanawajibika kwa huduma yako unaweza kuuliza mfanyikazi kupanga mkalimani kwa ajili yako bila malipo. Kitabu hiki kimetafsiriwa na kinapatikana kwenye tovuti ya SA Health. www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Tagalog

Ang Pambansang Serbisyo ng Paghahatid ay nagbibigay ng tulong sa mga taong mahina ang pandinig at hirap sa pagsasalita. Pambansang Serbisyo ng Paghahatid: http://relayservice.gov.au/ Telepono: 1800 555 660. Kung ikaw o ang iyong tagapag-alaga ay kailangan ng tulong sa pakikipag-usap sa mga propesyonal na may pananagutan sa iyong pangangalaga, maari kang makipag-usap sa isang kawani upang mabigyan ka nang interprete na walang bayad. Ang aklat na ito ay isinalin at makukuha sa websayt ng Kalusugan SA: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

## Tamil

செவி மடுப்பு மற்றும் பேச்சு விடயங்களில் உதவி தேவைப்படுபவர்களுக்கு ‘நேஷனல் ரிலே சர்வீஸ்’ – இனால் உதவ இயலும். ‘நேஷனல் ரிலே சர்வீஸ்’: http://relayservice.gov.au/ தொலைபேசி: 1800 555 660. உங்களுடைய கவனிப்பிற்குப் பொறுப்பாக இருக்கும் சுகாதாரத் தொழிலர்களுடன் பேசுவதில் உங்களுக்கோ அல்லது உங்களுடைய கவனிப்பாளருக்கோ உதவி தேவைப்பட்டால், இலவசமாக மொழிபெயர்த்துரைப்பாளர் ஒருவரை ஏற்பாடு செய்து தருமாறு எமது ஊழியர் ஒருவரை நீங்கள் கேட்கலாம். இந்த நூல் மொழிபெயர்க்கப்பட்டுள்ளது, மற்றும் www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities எனும் ‘SA சுகாதார’ வலைத்தளத்தில் இது கிடைக்கும்.

## Vietnamese

Dịch Vụ Tiếp Âm Quốc Gia (The National Relay Service) có thể cung cấp các dịch vụ hỗ trợ những người cần trợ giúp trong việc nghe và nói. Dịch Vụ Tiếp Âm Quốc Gia (National Relay Service): http://relayservice.gov.au/ Điện thoại: 1800 555 660. Nếu quý vị hoặc người chăm sóc quý vị cần trợ giúp để nói chuyện với nhân viên y tế đang chịu trách nhiệm về sức khỏe của quý vị, quý vị có thể yêu cầu thu xếp một người thông ngôn miễn phí. Quyển sách này đã được dịch và có thể tìm thấy trên trang web của Bộ Y Tế Nam Úc www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities

Interpreter

Xarunta Afcelinta iyo Tarjumidda
Telefoonka bilaash ka ah: 1800 280 203
https://www.translate.sa.gov.au/

# Tusmooyin


Xilqaadista daryeelka iyo adeegga 7

Daryeelka caafimaadkaaga – sida aad taageero uga geeysan karto 9

1. Helitaanka – xaqa loo leeyahay helitaanka caafimaadka iyo adeegyada bulshadaa 10
   - Qalliinka la doorto iyo sugaalka taxan 10
   - Kooxaha Caafimaadka ee Dadka Dalka loogu Yimid 11
2. Ammaanka – xaqa loo leeyahay in laga magan galo wixii xumaan ah 12
3. Tayada – xaqa loo leeyahay adeegyo ay tayadooda sarreyso 13
4. Xushmada – xaqa loo leeyahay in si xushmad leh leys kula dhaqmo 13
   - Amarrada durjunta Daryeelka 14
5. Wargelinta – xaqa loo leeyahay in leys wargeliyo 14
   - Bukaanta isbitaalka dawladda iyo kan gaarka ah 16
   - Taageerada lacageed iyo sicirrada 16
   - Adeegga Gaadiidka Bukaanka Koofurta Awstaraaliya 17
   - Qorshaha Taagerada Gaadiidka Bukaanka (PATS) 18
6. Ka Qeybqaadashada – xaqa loo leeyahay in si firfircoon looga qeybqaato 18
   - Oggolaasho 20
   - Ardayda 20
   - Macaamiisha Caafimaadk Maanka 20
   - Shaqaalaha Waaya aragnimada u leh adeegyada caafimaadka maanka 21
   - Carruurta 21
7. Arrimaha kuu gaarka ah – xaqa loo leeyahay arrimaha dadka u gaarka ah iyo kalsoonida 21
   - Goorta macluumaadkaaga gaarka ah la wadaagi karo 22
   - Isticmaalka macluumaadka si loo hagaajiyo adeegyada caafimaadka 23
8. Wax ka dhihidda – xaqa loo leeyahay in wax laga yiraaahdo iyo/ama ashtakada 23
   - Rafcaannada 25

# Xilqaadka daryeelka iyo adeegga

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa ka go’an iney siiso waaya aragnimo hubanti leh dhammaan dadka doonaya iney helaan adeeyada caafimaadka iyo kuwa bulshada. Si tan loo gaaro waxaan dooneynaa inaan ku siinno daryeel dallacsiinya naftaada.

Waxaan rabnaa inaan bixinno daryeel ammaan ah, leysku duway oo xushmeynaya xuquuqdaada iyo sharaftaada.

Haddii adiga ama daryeelayaashaada aad qabtaan wax su’aala ah ama walaac ah ama aaad u baahataan caawinaad si aad u fahamtaan waxa la leeyahay si aad go’aan u gaarto, fadlan weyddii mid ka mid ah kooxda daryeelka caafimaadkaaga. Shaqaalaha ayaa kuu diyaarin kara qof kuu afceliya haddii loo baahdo.

Madaxa Ashtakooyinka Caafimaadka iyo adeegyada Bulshada Axdigiisa Xuquuqaha Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ayaa iyagana laga helaa www.hcscc.sa.gov.au. Axdigu wuxuu soo bandhigayaa xuquuqahaaga, iyo kuw xubnaha qoyskaaga, daryeelayaashaada, ama dadka aad u dooratay iney ku matalaan. Waxaan daba joognaa inaan hagaajinno adeegyadeenna annagoo hubineyna in xuquuqahaaga si habboon loo qaddariyo.

Caafimaadka Koofuta Awstaraaliya wuxuu soo saaray afar qoraal oo si gaar ah u caddeynaya xuquuuqaha ay leeyihiin bukaannada caafimaadka maanka, daryeelayaashooda iyo qoysaskooda. Waxaa laga helaa: www.sahealth.sa.gov.au/upourightsandresponsibilities.

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa kale ee uu qiimeynayaa kana go'an in:

> Doorka daryeelayaasha, ayna ka mid yihiin daryeelayaasha dhallinyarada ah ee adeeggeenna caafimaadka. Fiiri Axdiga Daryeelayaaasha Koofurta Awstaraaliya iyo macluumaadka dheeraadka ah ee la xiriira xuquuqaha daryeelayaasha caafimaadka: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities.

> Qoraalka Caafimaadka Maanka Qaranka ee caddeynaya xuquuqaha masuuliyadaha: www.health.gov.au. Ka ka dibna raadi Qoraalka Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha Caafimaadka Maanta Qaranka.

> Xeesha lagu ilaalinayo xuquuqaha waayeellada Koofurta Australia: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities.

> Axdiga Xuquuqaha Carruurta iyo Dhallinyarada la daryeelo: www.gcyp.sa.gov.au/charter-of-rights-2/the-charter/

> Xuquuqaha Carruurta iyo Dhallinyarada ee la siiyo Adeegyada Daryeelka Caafimaadka: https://children.wcha.asn.au/children-and-young-peoples-rightshealthcareservices-charter

# Daryeelka caafimaadkaaga – sida aad taageero uga geeysan karto

Daryeel caafimaad oo wanaagsan sida ugu fiican ee lagu helo waa wada shaqyn dhexmarta adiga iyo xirfadlayaasha caafimaadka ee ku daryeela. Si aad nooga caawiso inaan ku siinno daryeel wanaagsan, waxaa lagama maarmaan ah inaad:

- U sheegto shaqaalaha haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama haddii ay jiraan wax aadan fahamsaneyn ama walaac kugu haya.
- Raacdo qorshaha daryeelka caafimaadkaaga ama la socodsii xirfadlaha daryeelka caafimaadkaaga haddii aadan rabin ama aadan yeeli Karin sidaa.

Macluumaadka lagaa doonayo inaad u sheegto shaqaalaha daryeelka caafimaadka:

- Taariikhda caafimaadkaaga iyo midda qoyskaagaba. Tan waxaa ka mid ah wixii dhibaatooyin ah, waxyaabo aan sahlaneyn in la fahmo, waxyaabo kaaga daray oo hore kuu saameeyey.
- Wixii daweyn ah ama daawooyin ah ee aad qaadato (ama ay tahay) inaad qaadato oo ay ka mid yihiin wixii lagu dheellitirayo, dabiici ama dawo laga doortay.
- Wixii isbeddel ah ee ku yimaadda xaaladdaada, oo ka mid yihiin dhibaatooyin kaa soo gaaray dawada ama daweynta aad heleyso.
- Wixii baahi gaar ah ee aad qabto, oo ay ka mid yihiin kuwo dhaqan ama diineed ama ka yimid naafannimo.

Fadlan tixgeli shaqaalaha iyo bukaanka kale:

- Ficillada rabshada, afxumada, handadaadda, ama cay afka ah oo lala beegsado bukaan kale, qaraabo ama mid ka mid ah shaqaalaha lama aqbalayo.
- Ballamahaaga dhawr. Haddii aadan awoodin inaad ballantaada dhawrto wargeli adeegga caafimaadka sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagal ka ah si ballan kale laguugu dhigo.

> La soco baahida bukaanka kale iyo arrimaha u gaarka ah.
> Ha keenin adeegga caafimaadka khamri, maandooriye aan sharci aheyn ama hub.
> Goobta isbitaalka iyo adeega caafimaadka marwalba waa ka mamnuuc in lagu dhuuqo sigaarka.

# Axdiga Xuquuqda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada

## 1. Helitaanka – xaqa loo leeyahay helitaanka caafimaadka iyo adeegyada bulshadaa

Dhammaan reer Koofur Awstaraaliya waxay xaq u leeyihiin adeegyada caafimaadka iyo kuwa bulshada ee haqabtiraya baahidooda.

Daryeelka caafimaadka waxaa la siiyaa dadweynaha oo dhan wuxuuna ku saleysan yahay qiimeynta xaaladdaada iyo sida dhaqsaha leh ee aad ugu baahan tahay daweynta.

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya wuxuu leeyahay barnaamijyo loogu tala galay in lagu taageero bulshada qaarkeed oo laga yaabo iney dhibaato kala kulmaan helitaanka adeegyada. Tusaale ahaan, dadka u baahan caafimaadka maanka, dadka naafada ah, dadka ay hayso dhibaato luqadeed ee aan wax aqrin Karin, hadalka ama maqalka uu ku dhib yahay, dadka aamminsan dhaqamada kala duwan, iyo dadka nugloon. Haddii aad u baahan tahay helitaanka adeegyada, fadlan kala hadal arrintan shaqaalaha ka socda adeegga caafimaadka.

### Qalliinka la doorto iyo sugaalka taxan

Haddii aysan xaaladdaadu aheyn mid nafta halis gelineysa, waxaa lag yaabaa in laguugu daro liiska kala horreynta ee qalliinka ama dawooyinka la doorto. Qaar ka mid adeegyada caafimaadka bulshada iyo caafimaadka ilkaha ayaa iyagana leh liiska kala horreynta. Macluumaad la xiriira liisaska kala horreynta

waxaa laga heli karaa sabbuuradda qalliinka la doorto: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities.

Waxaad xaq u leedahay:

> inaad ogaato inta aad sugeyso

> inaad ogaato haddii uu jiro adeeg caafimaad ee uu sugitaankiisa gaaban yahay, ama haddii ay jiraan fursado kale oo ii sahlayo in si dhaqsa ley leygu daweeyo

Haddii ay xaaladdaada ka sii darto, arrintan kala hadal dhakhtarkaaga guud (GP).

## Kooxaha Caafimaadka ee Dadka Dalka loogu Yimid

Qaar ka mid ah isbitaallada iyo adeegyada caafimaadka waxay leeyihiin Kooxo Caafimaad oo ah Dadka Dalka Loogu Yimid. Waxaad weyddiin kartaa shaqaalaha haddii la heli karo Koox Caafimaad oo ah Dadka Dalka Loogu Yimid ama Sarkaalka Xiriiriyaha Caafimaadka ee Dadka Dalka Loogy Yimid.

Waxay kuugu caawin karaan macluumaad ku saabsan sida uu isbitaalka u shaqeeyo, waxa ka socda, kuna siinaya macluumaad ku saabsan sida loo diyaariyo gaadiid iyo meel la seesxdaba.

Marka aad ka baxdo isbitaalka waxaa laga yaabaa iney kuugu xiraan shaqaalaha daryeelka caafimaadka bulshada, bulshooyinka Dadka Dalka Loogu Yimid iyo kuwa jasiiradaha Torres Strait iyo adeegyada caafimaad ee ay ka taliyaan bulshada Dadka Dalka Loogu Yimid, iyadoo ay ku xiran tahay baahidaada.

Kooxaha Caafimaadka Dadka Dalka Loogu Yimid ujeeddadoodu waa iney taageeraan dadka isticmaala adeegga Dadka Dalka Loogu Yimid ee u baahan

taageerada, waxaase jira mudnaan taa ka sarreysa oo loogu tala galay Dadka Dalka Loogu yimid iyo dadka jasiiradaha Torres Strait ee ka yimaadda miyiga iyo goobaha go'doonka ah.

## 2. Ammaanka – xaqa loo leeyahay in laga magan galo wixii xumaan ah

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya wuxuu aqoonsan yahay in bukaanka/macaamiisha, daryeelayaasha, dadka isxilqaama iyo shaqaalaha ay wada rabaan adeegyo caafimaad la geyn karo lana heli karo iyadoo aan qofna naftiisa khatar ama halis galeynin.

Isbitaallada iyo adeegyada caafimaadka waa goobaha bogsiinta iyo daryeelka. Waxaan sameyneynaa wax walba oo suurtagal ah si aan kuu magan gelinno kuuna siinno daryeel naxariis leh, oo kaa qaada kurbada:

> waxaad xaq u leedahay inaad ka magan gasho wixii xumaan ah

> waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel laguugu siiyo sida ugu dhibka yar ee suurtagalka ah

> waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel uu uu dhibkiisa yar yahay Isbitaallada iyo adeegyada caafimaadkaba waa goobo shaqo.

Fadlan tixgeli shaqaalaha, bukaanka kale iyo dadka booqda. Dhaqan halis gelinaya ammaanka shaqaalaha ama bukaanka kale, sida aflagaaddada ama jirdilka lama aqbalayo.

Dadka uu dhaqankoodu ku jirto gardarro ama dadka halis gelinaya, waxaa loo sheegayaa iney baxaan, ama loogu yeerayo boliiska ama nabad sugidda.

Fadlan isha ku hay astaamaha digista goor walbana kormeer carruurta.

Shaqaalaha adeegyada kuugu siiya guriga waxay xaq u leeyihiin iney ka shaqeeyaan goob ammaan ah. Ka hor inta aysan gurigaaga kuugu booqan, shaqaalaha way ku soo wici doonaan si ay u hubiyaan ammaanka.

## 3. Tayada – xaqa loo leeyahay adeegyo ay tayadooda sarreyso

### Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa ka go'an inuu hubiyo nidaamka caafimaadka Koofurta Awstaraaliya inuu ammaan yahay, leysku halleyn karo tayadiisana ay sarreyso.

Taa waxaan ku gaarnay annagoo leh qorshooyin iyo habab waafaqsan heerarka sharcigeenna, xirfaddeenna, anshaxeenna, ammaanka iyo tayada.

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya wuxuu si aan kala go' laheyn dib u eegis ugu sameeyaa siyaabaha wax loo qabto si loo hubiyo daryeel ammaan ah tayadiisana ay sarreyso. Waxaanu leenahay shaqaale si heer sare ah u tababaran iyo agabyo lagu bixiyo adeegyada caafimaadka kuwa ugu fiican. Waxaad filan kartaa in adeegyadeenna caafimaadka ay wada shaqeyn doonaan daryeelkaagana la isugu duwo si uu u haqabtiro baahidaada.

Warqad xaqiiqeed 'Warqad xaqiiqeedka booqashada dhakhtarkaaga – Ka mira dhali booqshada dhakhtarkaaga ama bixiyaha adeegga caafimaadka waxaa laga helaa: www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities.

## 4. Xushmada – xaqa loo leeyahay in si xushmad leh leys kula dhaqmo

### Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si ay ku jirto xushmad, sharaf iyo maamuus iyadoo aan la eegeynin da'daada, jinsigaaga, dareenkaaga jinsiyadnimo, diintaada iyo dhaqankaaga.

Waxaad xaq u leedahay in waxa aad jeceshahay, waxyaabaha aad aaminsan tahay iyo dhaqan galladaada la xushmeeyo ayna ka muuqdaan qorshaha daryeelka caafimaadkaaga. Shaqaalaha waxay xushmeyn doonaan sharaftaada.

Waxaad xaq u leedahay inaad hore ugu sii qorto waxyaabaha aad jeceshahay ee ku saabsan xushmeynta go'aannadaada la xiriira daryeelka daweynta caafimaadkaaga kuwa ku daryeelaya.

Dardaarankaaga waxaad ku dari kartaa Qoraalka Hore Loo Sii diyaariyo ee sharciga ah ama Qorshaha Daryeelka Hore loo Sii Diyaariyo ee aan rasmiga aheyn.

### Amarrada durjunta Daryeelka

Amarka Dardaaranka Daryeelka Hore Loo Sii diyaariyo wuxuu kuu saamaxayaa inaad foom sharci hore ugu buuxiya dardaaranka daryeelkaaga caafimaad ee mustaqbalka, marka aad dhimato, sida aad rabto inaad noloshaada ku dhameysato, iyo arrimahaaga gaar ahaaneed.

Amarka Dardaaranka Daryeelka Hore Loo Sii Diyaariyo wuxuu dhaqan galayaa goota uu gabo awood uu go'aan ku gaaro, taaso noqon karta mid ku meel gaar ah ama joogta ah.

Fadlan u sheeg shaqaalaha haddii aad leedahay Amarka Dardaaranka Daryeelka Hore Loo Sii Diyaariyo waxaadna siisaa nuqul la aqoonsan yahay kooxda u qaabilsan seexinta isbitaalka, iyo dhakhtarkaaga, iyo dadka aad u wakiilato iney go'aan ka gaaraan arrintaada

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo inaad soo rogato Foomka Amarka Dardaaranka Daryeelka Hore Loo Sii Diyaariyo booqo: www.advancecaredirectives.sa.gov.au.

## 5. Wargelinta – xaqa loo leeyahay in leys wargeliyo

Waxaad xaq u leedahay inaad la furato xiriir cad oo ku saabsan adeegyada, daweynta kuu bannaan iyo kharashyada oo loo dhigay si aad fahmi karto.

Bukaan ahaan, adiga ama wakiilka caafimaadkaaga[1] waxaad filan kartaan:

> in laguugu siiyo dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay luqad aad fahmi karto

1 Wakiilku waa qof u xilsaaran go'aan gaaris, Qof ka masuul ah, ama waalid u ah ilmo.

> in laguu sheego wixii halis ah ee adiga iyo qofka kula midka ah la soo gudboonaan karta, halistana laguu faahfaahiyo

> in laguu daweynta uu xirfadlaha caafimaadka soo jeediyo ama wixii kale oo habboon ee lagu beddeli karo si aad go’aan uga gaarto daryeelka caafimaadkaaga

> in lagu siiyo macluumaadka ku saabsan baaris caafimaad, oo ay ka mid yihiin wixii ku saabsan halis, iyo in laguu macneeyo natiijada iyo saameynta ay kuugu yeelan karaan

> in aad ogaato ujeeddada, faa’idada, iyo wixii ka imaan kara daweynta iyo/ama dawooyinka lagu siiyo

> in laguu faafaahiyo fursadaha guusha, haddii loo baahan yahay daweyn dheeraad ah, inaad dib u caafimaadeyso, bogsashada iyo baahidaada baxnaaninta

> in si cad laguugu faahfaahiyo waxa dhaca haddii uu khalad dhaco ama sidii lagaa filaayey aadan noqonin

> in aad is beddesho, ama diiddo baaris caafimaad ama daweyn marka ay noqoto iyo in lagula socodsiiyo diidista barista caafimaad ama daweynta

> inaad ogaato in daweyntu ay tahay mid tijaabo ah ama loo isticmaalayo cilmi baaris

> in lagaala tashto laguna siiyo qorshaha isbitaal ka bixidda, inta aan lagaa saarin, haddii dhakhtarka ku daweynaya uu garto in ay xaaladdaadu u baahneyn inaad isbitaalka sii joogto ama adeeg caafimaad kale

> in lagu siiyo macluumaad ku saabsan adeegyada caafimaadka kuu dhaw, ururrada gaarka ah, kaaliyayaasha, agabka iyo adeegyada laga yaabo iney ku caawin karaan

> haddii dhakhtarka ku daweynaya uu garto in daryeel kuugu habboon laga heli karo isbitaal kale lagana yaabo in laguu beddelo isbitaalkaa.

## Bukaanta isbitaalka dawladda iyo kan gaarka ah

Marka aad tageyso isbitaalka dawladda waxaad xaq u leedahay inaad doorato in laguu daaweeyo bukaan isbitaal dawladeed ama mid gaar ah iyadoo aan la eegeynin inaad leedahay ceymis caafimaad kuu gaar ah. Shaqaalaha waxay ku weyddin doonaan inaad qoraal ku magacawdo midda aad door bideyso.

Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato macnaha go'aanka iyo saameynta lacageed ee midda aad door bideyso.

Bukaan isbitaal dawladeed ahaan ma dooran kartid dhakhtarkaaga waxaana ku daaweyn doona dhakhtarka uu isbitaalka kuu xilsaaro. (Adeegyada caafimaadka qaarkood oo ay ka mid yihiin adeegyada ilkaha iyo haya'daha gargaarka deg degga miyiga waxay bixiyaan kharashyo).

Bukaanka leh ceymis caafimaad u gaar ah wuxuu dooran karaa in loo daweeyo bukaan isbitaal dawladeed ahaan.

Marka aad tahay bukaan gaar ah waxaa ku daweyn doona dhakhtarka aad doorato, waase haddii uu dhakhtarkaasi leeyahay ruqsad uu kaga hawl galo isbitaalkaas uuna oggolaalaado inuu kuugu daweeyo bukaan gaar ah ahaan isbitaalkaas. Bukaannada gaarka ah waxay masuul ka yihiin iney bixiyaan kharashyada oo dhan.

Hadii aadan xaq u leheyn Medicare ama aad ku lug leedahay sheegasho magdhaw waxaa kuu furan doorasho bukaan kale oo aan bilaash aheyn.

## Taageerada lacageed iyo sicirrada

Dhammaan dadka deggan Awstaraaliya ee leh kaarka Medicare ka waxay xaq u leeyihiin in lagu daweeyo bilaash marka ay bukaan ahaan u tagaan isbitaalka dawladda. Badanaaba, nidaamka caafimaadka dawladda Koofurta Awstaraaliya waa u bilaash bukaan dawladeed haan. Haddii ay tahay inaad bixiso kharash hore ayaa laguugu sii sheegayaa waxaadna heleysaa qoraal arrintaa ku saabsan.

Waxaa laga yaabaa inaad bixiso:

> lacagta dawooyinka uu isbitaalka ku siiyey / adeegga caafimaadka

> haddii aad isbitaalka ku jirto in ka badan 35 maalmood kharashka maalmaha dheeraadka ah

> noocyo ah agab aan looga maarmin daweyntaada.

Haddii aad doorato in laguu daweeyo bukaan gaar ah ahaan waxaad u baahan doontaa inaad bixiso:

> kharashyada jiifka isbitaalka

> kharashyada adeegyada daweynta, baaritaanka, kaaliyeyaasha iyo ilkaha.

Kharashyadan waxaa laga yaabaa inuu bixiyo ceymiska caafimaadkaaga gaarka ah, waxaadse u baahan tahay inaad kala hadasho ceymiskaaga ka hor inta aan lagu dhigin isbitaalka.

Kharashyo kala duwan ayaa laga qaadaa dadka dalka dibaddiisa uga yimid booqasho ama ku dalka ku jooga fiisa ku meel gaar ah. Waxaad ka hubin kartaa inaad xaq u leedahay Medicare telefoonka: 13 20 11 ama telefoonka AustHealth: 1800 724 457 ama emailka info@aushealth.com.au.

## Adeegga Gaadiidka Bukaanka Koofurta Awstaraaliya

Adeegga Gaadiidka Bukaanka Koofurta Awstaraaliya wuxuu bixiyaa taageerada gargaarka deg degga caafimaadka, daweynta iyo gaadiidka, gaadiidka bukaanka ee aan deg degga aheyn iyo daryeel ay tayadiisa sarreyso oo loogu tala galay dadweynaha Koofurta Awstaraaliya.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso kharashka adeegyada. kharashka Gaadiidka bukaanka ma aha mid uu daboolo Medicare addeegyada gaadiidka bukaankana ma awoodaan iney kaala taliyaan kharashkan ka hor inta ayan gaadiid ku siinin.

Ceymiska caafimaadka gaarka ah waa laga yaabaa inuu daboolo kharashka gaadiidka bukaanka. Ka hubso ceymiska caafimaadkaaga gaarka ah.

Haddii aad u baahato gaadiid bukaan marka isbitaalka lagaa saaro waxaa lagu weyddiin doonaa inaad inaad bixiso kharashyada la xiriira.

Dadka lagu amro daweyn aaney raalli ka aheyn ama qeybta 56 ee Sharciga Caafimaadka Maanka 2009 waxaa laga yaabaa in ay kharashka Adeegga Gaadiidka Bukaanka Koofurta Awstaraaliya ay bixiso Shabakadda Caafimaadka u dhaw.

Adeegga Gaadiidka Bukaanka Waxay bixisaa ceymis lagu taageero kharashyada. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga helaa: www.saambulance.com.au ama telefoonka: 1300 13 62 72.

Si aad ulaxiriirto Adeegga Gaadiidka Bukaanka Koofurta Awstaraaliya wac 000.

### Qorshaha Taagerada Gaadiidka Bukaanka (PATS)

Qorshaha Taagerada Gaadiidka Bukaanka (PATS) waa barnaamij kaalmo dhaqaale oo bixiya lacagta leysaga bixiyo safarrada qaarkood, geynta iyo kharashyada jiifka marka dadweynaha Koofurta Awstaraaliya ee ku nool miyiga ay safrayaan masaafo ka badan 100 kiilomitir si ay ugu tagaan xirfadlaha daweeya. Si aad u hesho kaalmada dhaqaale ee PATS waxaad u baahan tahay in aad:

> ka hubiso PATS ka kuu dhaw in aad xaq u leedahay taageerada

> weyddiso PATS ka kuu dhaw in uu kuu soo diro foomka arjiga ama aad ka soo rogato foomka barta internetka

Macluumaadka iyo faahfaahinta lagala xiriiro xafiiska PATS ka kuu dhaw waxaa laga helaa: www.sahealth.sa.gov.au/PATS ama telefoonka 08 8226 7215.

## 6. Ka Qeybqaadashada – xaqa loo leeyahay in si firfircoon looga qeybqaato

Marka aad gaareyso go’aan ama aad bixineyso oggolaasho ku saabsan daryeel, baaris caafimaad ama daweyn waxaad xaq u leedahay:

> in aad lug ku yeelato dhammaan go’aannada ku saabsan daryeelkaaga aadna weyddiso su’aalo si aad u fahamto waxa laga yaabo iney dhacaan

- in lagu siiyo waqti aad kaga fekerto kalana xaajooto daryeelka caafimaadkaaga fursadaha daweynta kuu furan qoyskaaga, saaxibbadaa, daryeelayaasha ama Go'aan Gaarayaasha ku Beddeli Kara[2]
- in aad raadsato talo labaad iyo/ama macluumaad ku saabsan ogaanshaha cudurkaaga iyo fursadaha daweynta
- in lagu siiyo sharraxaadda waxyaabaha ka imaan kara haddii aad qaadan weydo talada xirfadlaha caafimaadka
- in aad magacawdo Go'aan Gaare ku beddela si uu go'aanno u gaaro marka aadan awoodin
- in lagaa taageero si aad u gaarto go'aan ku saabsan daryeelkaaga ama daweyntaada haddii aad awood u leedahay inaad gaarto go'aan. Haddii aadan awood u laheyn inaad gaarto go'aan, Go'aan Gaaraha Beddelkaaga ah ama Qofka ka Masuulka ah[3] ayaa lala xiriiri doonaa haddii la helayo ayna oggol yihiin iney go'aan gaaraan iyagoo kaa wakiil ah
- in aad diiddo daweynta nolosha dheereysa iyo inaad hesho daryeelka xanuun qaadista
- in aad diiddo in aad ka qeybqaadato cimi baaris caafimaad ama tijaabooyin
- mar walba oo aad adiga iska saarto adeeg caafimaad in halista ka timaadda aad mausuul ka tahay marka laga reebo haddii uu ku saran yahay amarka daweynta bukaanka ama mid bulsho kaasoo hoos yimaada Sharciga Caafimaadka Maanka 2009 ama lagaaga baahan yahay inaad isbitaalka joogta si laguugu daweeyo waayo waxaa ku saran amarka 32 ee hoos yimaada Sharciga Maamulka iyo Ilaalinta 1993 ee ka yimid Hay'adda Maamulka Rayidka ee Koofurta Awstaraaliya.

2. Go'aan Gaare ku Beddela qof ama dad badan oo aad ku kalsoon tahay iney gaaraan go'aanno ku khuseeya marka aadan awoodin.
3. Qof masuul ah waa xubin ka tirsan qoyska, saaxib kuu dhaw ama qof aad isku dhaqan tihiin oo ka mid ah bulshadaada.

## Ogglaasho

Waxaa laga yaabaa in lagu weyddiyo in aad saxiixdo foom oggolaasho oo qiraya inaad oggolaatay daweyn caafimaad ama baaris caafimaad kuwaas oo laguu sharraxay. Waa masuuliyadda xirfadlaha caafimaadkaaga in uu go'aan ka gaaro in aad awooddo inaad bixiso oggolaasho daweyn caafimaad, ama daryeel caafimaad.

Marxaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo daweyn caafimaad deg deg ah adiga oo aan oggolaasho bixin, haddii ay jirto halis ku soo fool leh naftaada iyo caafimaadkaaga.

Waxaa laga yaabaa in ay sidaa noqoto, haddii aadan hore u tilmaamin in aadan oggoleyn daweyntaa ama uu jiro qof kaa wakiil ah oo kuu gaara go'aan laguugu siiyo daweyn caafimaad oo deg deg ah.

## Ardayda

Ardayda caafimaadka, kalkaaliyayaasha iyo arday kale ee la xiriira caafimaadka ayaa mararka qaar jooga ama ka bixiya daweyn iyagoo la kormeerayo isbitaalada dawladda iyo adeegyada caafimaadka iyagoo oggolaasho kaa haysta. Tani waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashadooda.

## Macaamiisha Caafimaadk Maanka

Waxaad leedahay mid la mid ah xuquuqda uu leeyahay qof walba.

Haddi uu ku saaran yahay amarka daweynta bulshada ama amarka daweynta hoos yimaadda sharciga Caafimaadk Maanka 2009, waxaa lagu siin karaa daweyn iyadoo aan lagaa haysan oggolaasho.

Daweyntu waa iney ahaato midda ugu dhibka yar uguna waqti gaaban ee ugu habboon. Waa iney noqotaa mid lagu baaninayo tixgelineysana dardaaranka aad ka sameysay Amarka Daryeelka Hore Loo Sii Diyaariyo ama Heshiiska Ulysses.[4]

Qofka aad ku beddelaneyso Go'aan Gaariska iyo qofka Masuulka ah ayaa kuu gaari kara go'aannada haddii aadan awoodin.

4 Heshiiska Ulysses waa qorshe ay sameeyeen qoyska iyo xirfadleyaasha caafimaadka maanka oo la xiriira daryeelka carruurta, marka marka waalidku aanu fayoobeyn xanuun maanka ah awgiis.

## Shaqaalaha Waaya aragnimada u leh adeegyada caafimaadka maanka

Shaqaalaha Leh Waaya Aragnimo Nololeed waa dadka hore u haan jiray bukaan caafimaadka maanka/macaamiisha ama daryeelayaashooda. Shaqaalaha leh waaya aragnimo nololeed waxaa laga helaa dhammaan goobaha daryeelka caafimaadka madaxa waxayna kaa taageeri karaan adiga, qoyskaaga iyo saaxibbadaa iney ku siiyaan macluumaad iyo taageero.

## Carruurta

Waalid ahaan[5] ama qof ka masuul ah ilmo, waxaad xaq u leedahay in aad gaarto go'aanno adeeg oo matalaya ilmaha. Waxaad ilmahaaga la joogi kartaa isbitaalka iyo addeg caafimaad kale, oo aan ka aheyn meel aaan looga mmarmin gargaarro caafimaad deg deg ah ama sababo caafimaad kale. Carruurta waxaa kale oo ay xaq u leeyihiin iney waalidkood ama ilaaliyayaashooda ay xaadir ahaadaan.

Carruurta marka ay koraan (da'dooduna ka weyn tahay 16 jir) waxay xaq u leeyihiin in lala tashado iyo iney go'aan iyagu gaaraan. Xirfadle caafimaad ayaa daweyn kara haddii ilmuhu da'diisa ka yar tahay 16 hadduu ilmuhu oggol yahay xirfadlaha cafimaadkana uu ku qanacsan yahay in uu ilmuhu awoodo inuu fahmi karo daweynta, xirfadle caafimaad kalana uu taageersan yahay fikraddaa.

# 7. Arrimaha kuu gaarka ah – xaqa loo leeyahay arrimaha dadka u gaarka ah iyo kalsoonida

Macluumaad kuugu saabsan ayaa waxaa ururin doona Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya si lguu siiyo daweyn iyo adeegyaba.

Macluumaadkaaga si ammaan ah ayaa loo keydiyey helitaanka macluumaadkaagana wuxuu ku kooban yahay kuwa ku lug leh daryeelkaaga.

5 Tan waxaa ka mid waalidiinta aan iyaga dhalin ilmaha, ama qaan gaarka masuulka ka ah ilmaha maalin walba, tusaale ahaan ayeeyo ama awoowe daryeela ilmaha iyaga oo ka wakiil ah waalidkood.

Waxaa laga yaabaa inaad diiddo in aad bixiso macluumaadka qaarkood, laakiin tani waxay saameyn ku yeelan kartaa daryeelkaaga ama daweyntaada.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato helitaanka qoraalladaada diiwaan gashan, haddii uusan jirin sharci kaa reebaya.

Haddii aad aamminsan tahay in macluumaadkaaga diiwaan gashan aanu sax aheyn, waqtigiisa la dhaafay, ama kaa been sheegaya, waxaad codsan kartaa in macluumaadkaaga diiwaanka ku jira wax laga beddelo. Ka hubi shaqaalaha adeegga caafimaadka sida tan loo sameynayo.

## Goorta macluumaadkaaga gaarka ah la wadaagi karo

Xirfadlayaasha Caafimaadka waxay isticmaali karaan diiwaankaaga cafimaadka gaarka ah si isagala xiriiraan daryeelka aad hesho. Sharciga Daryeelka Caafimaadka 2008 iyo Sharciga Cafimaadka Maanka 2009 waxay tilmaamayaan goorta macluumaadka ku khuseeya loo sheegi karo dad kale ama daryeel bixiyeyaal.

Macluumaadkaaga gaarka ah waxaa laga yaabaa in lala wadaagi karo daryeel bixiye kale si laguugu diyaariyo daryeel marka aad ka baxdo isbitaalka.

Macluumaadkaaga gaarka ah wxaa laga yaabaa in lala wadaago adiga oo oggol:

> ceymiska caafimaadkaaga gaarka ah ama

> hay’ad kale WorkCover ama Hay’adda Shilka Baabuurta.

Mararka qaar Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa laga yaabaa in looga baahdo ama sharciga u oggolaado iney tusaan macluumaad kuugu saabsan dad kale adiga oo aan oggolaasho bixin. Tan waxaa laga yaabaa iney ka mid tahay marka ay tahay lagama maarmaan in la yareeyo ama laga hortago:

> wax nafta halis gelinaya

> dhibaato loo geysto ilmaha

> rabshada qoyska ama

> in la ilaaliyo bad baadadaada ama/iyo ammaanka kuwa kale.

## Isticmaalka macluumaadka si loo hagaajiyo adeegyada caafimaadka

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya waxaa laga yaabaa inuu isticmaalo macluumaad ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga si uu u hagaajiyo adeegyada daryeelka caafimaadka, si uu u qorsheeyo adeegyada mustaqbalka, ama cilmi baaris, Tani haddey dhacdo, macluumaadka la isticmaalo kuma jiri doona macluumaadka gaarka ee adiga tilmaan kaa bixinaya.

Haddii aad rumeysan tahay in macluumaadkaaga gaarka ah loo wadaagay si aan sabab laheyn ama loo helay, waxaad kala xaajoon kartaa adeegga caafimaadka ama aad u ashtakoon kartaa Madaxa Ashtakooyimka Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (fiiri bogga 24aad ee faahfaahinta xiriirka) ama Guddiga Arrimaha Gaarka ah ee Koofurta Awstaraaliya.

Guddiga Arrimaha Gaarka ah waxaa lagala xiriiri karaa telefoonka 08 8204 8786 ama www.archives.sa.gov.au.

Wixii ku saabsan helitaan aan habbooneyn oo la xiriira macluumaadkaaga gaarka ah ama si ula kac ah waa mid si dhab ah loo qaadanayo. Haddey tani dhacdo waa lagula soo xiriirayaa.

# 8. Wax ka dhihidda – xaqa loo leeyahay in wax laga yiraaahdo iyo/ama ashtakada

Caafimaadka Koofurta Awstaraaliya wuxuu ku dhiirri gelinayaa bukaanka/macaamiisha, qoysaska, daryeelayaasha iyo bulshadaba iney talo na siiyaan. Wax ka dhihidda, bilista, ashtakooyinka iyo waxyaabaha la soo jeediyo waxay naga caawiyaan in aan hagaajinno adeeggeenna caafimaadka.

Waxaad xaq u leedahay in:

> aad wax ka tiraahdo ama aad weyddisi su’aalo ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga iyo waaya aragnimada

> aad noo sheegto haddii aad u maleyso in daryeelka caafimaadkaaga aanu ku soconin sidii loogu tala galay

- walaaca iyo ashtakooyinkaaga si habboon loo qaddariyo cudurdaar iyo sharraxaadna lagaa siiyo
- aad na siiso wixii talo ah ee aad soo jeedineyso.

Sida aad u siin karto ra'yigaaga adeegga caafimaadka:

- muuji walaacaaga adigoo kala hadlaya shaqaalaha ku daryeela ee adeegga caafimaadka. Waxaa kale oo aad wici kartaa ama qoraal u diri kartaa adeegga caafimaadka.
- haddii aad dareemeyso walaacaaga aan waxba laga qaban, waxaad la xiriiri kartaa la taliyaha bukaanka/macaamilka, Isuduwaha Talooyinka Bukaanka ama Isuduwaha Tayada (ee adeegyada miyiga). Booqo www.sahealth.sa.gov.au/yourrightsandresponsibilities.

Si dhab ah ayaan u qaadanna shilalka iyo sigashooyinka. Waxaan u isticmaalnaa inaan baranno sida loo hagaajiyo daryeelka loogana hortago shilalkaas mustaqbalka. Wixii shilal ah ee kuugu lug leh waxaa loo maareyn doonaa si furan oo cad.

Haddii aadan ku faraxsaneyn ka warcelinta taladaada waxaad la xiriiri kartaa hay'adda u doodista iyo ashtakooyinka madaxa bannaan. Hay'adahan waxaa ka mid ah:

### Madaxa Ashtakooyinka Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada

Waa xafiis madax bannaan dadka (isticmaala adeegga, daryeelayaasha iyo adeeg bixiyayaasha) qaba ashtakooyin ku saabsan adeegyda caafimaadka iyo bulshada Koofurta Awstaraaliya.
Isniin ilaa Jimco 9.00 subaxnimo ilaa 5.00 galabnimo Telefoon 08 8226 8666 ama midka bilaashka ah ee miyiga 1800 232 007 www.hcscc.sa.gov.au

### Qorshaha Booqashada Bulshada Naafada iyo Caafimaadka Maanka

Waa hay'ad madax bannaan oo xallisa ashtakooyinka taasoo baarta goobaha daweynta idman una doodda xuquuqda dadka naafada ah iyo bukaanka caafimaadka maanka ee ku jira goobaha daweynta.

Telefoon: 08 7425 7802 ama midka bilaashka ah ee miyiga 1800 606 302 www.sa.gov.au/ (ka dibna baar Qorshaha Booqashada Bulshada).

### Xafiiska U Doodista Dadweynahaa

Waa hay'ad madax bannaan oo la talisa, taageerta una doodda dadka aan awoodda u laheyn iney go'aan gaaraan, kana caawisa xallinta khilaafaadka ku saabsan go'aannada daryeelka caafimaadka.

Telefoon: 08 8342 8200 ama midka bilaashka ah ee miyigall free 1800 066 969
www.opa.sa.gov.au

## Rafcaannada

Waxaad xaq u leedahay inaad ka raadsato dhexdhexaadin xafiiska u Doodista Dadweynaha haddii uu jiro khilaaf ku saabsan Amarka Daryeelka Hore Loo Diyaariyo ama diidmo daweyn caafimaad ama daryeel caafimaad.

Xiriir ka baxsan saacadaha shaqada oo deg deg ah kala xiriir Xafiiska u Doodista Dadweynaha telefoonka: (08) 8378 3333.

Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadato Hay'adda Maamulka iyo Rayidka Koofurta Awstaraaliya (SACAT) (hore loo dhihi jiray Hay'adda Ilaalinta), haddii uu  ku hayo Sharciga Caafimaadka Maanka 2009 ama amarka daweynta qeybta 32 ee hoos taga Sharcia Ilaalinta iyo Maamulka 1993 aadna ku qanacsaneyn amarka.

Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aanka SACAT adigoo aadaya maxkamadda degmada ama maxkamadda sare ee la xaasha Sharciga Ilaalinta iyo Maamulka 1993.

SACAT waxaa lagal xiriiri karaa 1800 723 767 ama www.sacat.sa.gov.au.

Foomamka Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga ee Axdiga Bukaanka Isbitaallada Dawladda, sida ku qeexan Heshiiska Daryeelka Caafimaadka Qaranka ee u dhexeeya Dawladaha Koofurta Awstaraaliya iyo tan Barwaaqosooranka.

Nuqullo dheeraad ah ee buuggan waxaa laga heli karaa:

Bukaanka iyo Daryeelayaasha:
www.sahealth.sa.gov.au

Isbitaallada iyo Adeegyada Caafimaadka:
SA Health Distribution Centre
Email: healthPSCMSCOcustomerService@sa.gov.au
Fax: 08 8124 4655
www.sahealth.sa.gov.au

Public-I1-A1

Qoraalkan waxaa dib u eegay oggolaadayna SOCAG* ee macaamiisha iyo bulshada Febraayo 2016

Interpreter

BY NC ND

www.ausgoal.gov.au/creative-commons

© Hay'adda Caafimaadka iyo Gabowga, Dawladda Koofurta Awstaraaliya.

Xuquuqda oo dhan waa kuwo dhowrsan. ISBN: 978 07 03 898 276 FIS: 16002.1 Abriil 2016

*Kooxda Kala Talisa Bulshada Ammaanka iyo Tayada ee Koofurta Awstaraaliya.

Government of South Australia
SA Health